



Waxaa jira isbeddello qaar oo muhiim ah oo lagu sameeyay xeerka culeyska dowladda (public charge). Waxaan rabnaa inaad haysato xog sax ah si markaa aad u sii wadato in qoyskaaga ay u sii ahaadaan kuwa deggan oo ladan. Waxaan nahay reer Colorado oo xoogan marka dadka degan oo dhan ay haystaan barnaamijyada muhiimka ah ee taageera bulsho ee caafimaad qab ah.

Waa maxay Culeyska Dowladda (public charge)?

Dadka qaar waa inay ku baasaan imtixaanka culeyska dowladda goorta ay buuxsanayaan kaarka degnaanshaha (green card) (kaarka degnaanshaha rasmiga ah ama dal-ku-galka (visa) Maraykanka lagu soo galo. Imtixaanka wuxuu fiirinnayaa haddii shaqsiga ay u badan tahay in mustaqbalka uu isticmaalayo adeegyada dowladda ay fidiso iyo in kale. Saraakiisha laanta socdaalka marka ay go'aankan ay gaarayaan waxay dib u fiiriyaan marxaladdaha shaqsiga oo dhan, oo ay ku jiraan da'da, daqliga, caafimaadka, xirfaddaha/waxbarashada, iyo xaanshida dhaarta kafaala qaadka ama heshiiska. Waxay sidoo kale ay texgeliyaan haddii shaqsiga uu hore u isticmaalay barnaamijyada dadweynaha qaarkood.

Maxaa dhowaan isbeddellay?

Xeerka culeyska dowladda ayaa sanaddo badan soo jiri jiray, laakin sanadka markuu ahaa 2019, xeerka waa la ballaariyay oo waxaa lagu daray barnaamijyo manfacyo dheeri ah. Si kastaba ha ahaatee, sababo la xiriira wixii iska soo dabadhaacy ee dhowaan ee la xiriiray maxakamadda dowladda federaalka iyo tallaabooyin dhowaan ee ay qaaday maamulka dowladda federaalka, dowladda hadda wixii ka bilowdo kuma dabaqayso xeerka culeyska dowladda ee 2019. Isbeddelladan dhowaan ee dhacay ee heerka qaran, xeerka wuxuu dib ugu laabanayaa kii horey u jiray ee 1999, kaas oo baax ahaan aad u xaddidnaa.

Waa kuwee barnaamijyada manfaca dadweynaha ee ku jira imtixaanka culeyska dadwaynaha?

BARNAAMIJYADA KU JIRA*

1. Barnaamijka taageerida lacageed (SSI, Colorado Works/TANF, OAP (Da'da Hawl Gabka), IYO (Gargaarka kuwa Baahan ee Naafada ah)
2. Barnaamijyada dowladda ku deeqdo ee taageerada muddada-dheer, daryeelka xarumaha lagu taageero.

BARNAAMIJYADA LAGA REEBAY

1. Barnaamijka Caawinaada Kabka Nafaqada (SNAP, Gargaarka Cuntada, ama Kuubannada Cuntada (Food Stamps)
2. Guryeynta Dawlada Federaalka & foojarada guryaha ee (Qaybta 8/Foojarrada Xulashada Guryaha iyo Sii wadida Daryeelka)
3. Caymiska Caafimaadka ee Medicaid/Health First Colorado
4. Caymiska Emergency Medicaid
5. Haweenka Dhallaanka iyo Caruurta (WIC)
6. CHIP iyo CHP+
7. Quraacda & qadada iskuulka
8. Kaalmada Tamarta (LEAP)
9. Baaqa Canshuurta (sida EITC)

“Barnaamijyada lagu daray” waxaa laga wadaa barnaamijyada dowladda ee loo texgeliyo inta lagu jiro imtixaanka culeyska dowladda, iyo sidoo kale arimo kale sida daqli, shaqsiyaad qaarkood inta lagu jiro hannaanka laanta socdaalka qaarkood. “Barnaamijka aan lagu darin” looma texgeliyo.



10. CCCAP

11. Barnaamijyada manfacyada kale oo dhan

Waayo kuwa uu Quseeyo Xeerka Culeyska Dowladda?

Xeerkan culeyska dowladda ma saamaynayo dhammaan dadka soo galootiga oo dhan.



Muwaadiniinta Mareykanka

Culeyska dowladda idinka idin **MA** khuseeyo.



Kuwa haysta degnaansho rasmi ah/kuwa haysta sharciga (green card)

Culeyska dowladda idinka idin **MA** khuseeyo. Xeerkan **MA** saameyn doono kuwa arjiga u qonaya inay qaataan dhalashada ama kuwa cusboonaysiinaya kaarka (green card) ka. (*Si kastaba ha ahaatee, haddii aad qorheynaysid inaad ka tagto Maraykanka, in ka badan 180 maalmood, kala tasho qabiir sharci yaqaan.)



Shaqsiyaadka ku jooga Xaalad Ilaalin ku Meelgaar ah (TPS), ee fiisaha U ama T, Magangalyo doon, Qaxooti, dad weynaha ke qaxootinimo u qalma, ama Xaalad Dahliinyaro ee Soogalootimoo Gaar ah haysta, oo ay ku jiraan kuwa codsanaya xaaladdahan

Culeyska dowladda idinka idin **MA** khuseeyo.



Shaqsiyaadka qorshaynaya inay buuxsadaan kaarka (green card) ama fiiso iyagoo jooga wadanka Maraykanka gudahiiisa

Culeyska dowladda waxaa dhici karta **INAY** ku khuseeyso. Isticmaalka barnaamijyo dowladeed oo yar ee (kor ku qoran) oo kaliya ayaa loo texgelin doonaa arjiga, iyo kuwo kale sida daqliga oo kale.



Shaqsiyaadka buuxsanaya kaarka (green card) ama fiiso iyagoo jooga wadanka Maraykanka dibaddiisa

Culeyska dowladda waxaa dhici karta **INUU** khuseeyso. Kala hadal qabiir ka hor intaadan go'aan ka gaarin.

Maxaan kale oo aan u baahanahay inaan ogaado?

- Soogalootiga badankood ee qabanaya culeyska dowladda ma aha kuwa xaq u leh manfacyada imtixaanka hoos yimaada, oo manfacyada badankood looma texgeliyo oo looma qiimeeyo inay yihiin culeys dowlad.



COLORADO Culeyska Dowladda (Public Charge): Waxaa la CUSBOONAYSIYAY Maarso 2021

- Xeerla wakhtiga hadda la joogo lagu dabaqo wa isla xeerkaa soo jiray tan ilaa 1999 oo aad ayuu u xaddidan yahay marka loo fiiriyo xeerka 2019.
- Tallaalka cudurka COVID-19 loo ma arko oo loo ma texgelin doono inuu yahay sida hoos timaada culey dowlad.
- Haddii aad ka welwelsan tahay waxyaabo ku saabsan xeerka culeyska dowladda, fadlan la xiriir qabiir dhanka sharciga ama hay'ad aad ku kalsoon tahay ee jaaliyadda. Waxaan rabnaa in qoyskaaga ay sii ahaadaan ammaan ah oo caafimaad qaba, oo barnaamijyadeena ayaa kaa caawin kara inaad taasi hesho.